



# Noocyada Maacuunta








# Noocyada Maacuunta

Leveled

Grade 2

Week 20



Buuggan akhriska dheeriga waxaa maalgalisay hay'ada USAID. Wuxaan si wada jir ah isaga kaashaday daabcayna hay'ada Save the Children, wasaarada waxbarashada heer federal iyo xafiiska waxbarashada DDSI.

2008 T.I.




The CC By license lets others distribute, adjust, and build upon this work, for free or commercially, as long as credit is given to the original creation. However, any changes from the original must be indicated.

For more info please refer: <https://creativecommons.org/licenses/>




Maacuuntu waa Agabka  
aynu u adeegsano  
cuntada.



Maacuunta waxay u  
qaybsantaa dhawr nooc.




Qayb waxaynu ku cunaa  
cuntada sida saxanada  
iyo bilaydhada.



Qaarna sharaabka ayaynu  
ku cabnaa sida koobasha.



Qaarna waxbaynu ku  
karsanaa sida dusuuda.




Qaarna waxbaynu ku  
shubanaa sida joogaga  
iyo baaquliyada.



Qaarna cuntadaynu ku  
jarjaranaa sida mindiyaha.



Qaarna cuntada cunideeda  
ayay inaga caawiyaan  
sida malqacadaha.




Maacuunta waxaa laga  
sameeyaa waxyaaboo kala  
duwan.



Qaarbaa geedoha laga  
samayaa sida qorilawaxa  
iyo fandhaalada.



Qaarna waxay ka  
samaaysan yihiin bir sida  
saxanada.



Qaarna waxay ka  
samaysan yihiiin dhoobo  
sida koobasha iyo  
dheriyada.

